# Golaha Wakiiladda

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

***Golihii 5aad ee Wakiillada, Fadhigii 10aad ee Kal-fadhiga 6aad***

***Wakhtiga 10:20* Am** ilaa **11:40 Am**
***Taariikhda: - Sabti 9 September 2023***

**Guddoonka: -** Md. Yaasiim X. Maxamuud Xiir (Faratoon)

**Quranka: -** Md. Sh. Axmed Dayib

Ajandaha Fadhiga:- Dooda Xeerka Ciidamada Qaranka

Md. Axmed Cabdi Ibraahin (Timo-jilic) *(12min, 14sec):–* Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka, Mudanayaasha iyo Shaqaalahaba waad salaamantihiin.

Arrimaha ciidamada inta badan waxa looga hadlaa si hoos-hoos ah, inkastoo caalamka laga wada yaqaan in cid walba ay leedahay awooddeeda, dhaqaalihiisa, bulshadiisa inta ciidan noqon karta iyo qaybta la difaacayaba, ha noqoto dhul ama bad.

Guddidii xeerkan ka soo shaqaysay hawl qiimo badan ayay qabteen, waana uga mahad-naqayaa. Miisaaniyaddeenna 2023-ka, marka lagu daro 3.6%-kii kordhinta sanadka, difaaca 10.10.100, difaaca 10.10.200, difaaca 10.1.1000 iyo Wasaaradda Gaashaandhigga, afartaas marka la isku daro waa 538 bilyan, halka bishii ay noqoneyso 44 bilyan. Arrintaas waxaan u soo qaadanayaa in aynu dhiraandhiris guud ka samaysanno si aynu u fahamno xaaladda.

Sidaa awgeed, marka waxa aynu haysanno intaa le'eg yahay, muxuu noqonayaa ciidanku, agabkiisu muxuu noqon karaa, shidaalkiisuna muxuu noqon karaa, iyada oo waxa aynu ansixinaynaa uu ku salaysan yahay dhaqaalaheenna, qaanuunkeenuna ku qotomo itaalkeenna. Haddii aynu nidhaahno ciidanka aynu qoranaynaa bulshadeenna waa 2%, annaga oo aan kala qaad-qaadin darajooyinkooda iyo tiradooda, oo aynu qaadanno halbeeg caadi ah, ama aynu nidhaahno waa intee tirada guud ee ciidanka dalku difaaci karo.

Marka aynu nidhaahno 2%, waxay noqonaysaa qiyaastii 100,000, kuwaas oo ay ku jiraan kuwa dhintay ee weli carruurtoodu waxbarasho ku jiraan, iyo kuwa dhawaan dhintay. Marka sidaa loo eego, waxa laga yaabaa in la yidhaahdo lacagtu way badan tahay, balse dhinaca kale marka loo eego waa mid ina xaddidaysa.

Mudanayaal, markii guddidu soo jeedisay xeerka, fal-celinta bulshadu waxay u badnayd in la moodo in jannaanada oo keliya wax loo kordhinayo. Dhanka kale, waxa loo baahan yahay in la ogaado inta ciidan ee inoo joogta, inta dablayaal ah, inta aliflayaal ah. Xeerka

wanaaggiisu waa in aan lagu salayn dhacdo keliya oo taagan, balse la dejiyo, dabadeedna wixii ka soo baxa lagu sameeyo wax-ka-beddel iyo kaabis.

Sidaa awgeed, ciidanku waxa uu ka bilaabmaa dable; nin baa ku soo biira waa laba, nin saddexaad baa ku soo biira waa saddex. Iyadoo aynu hayno dardaarankii Rasuulka (NNKH) ee ahaa laba iyo wax ka badan haddii aad noqotaan mid baa idin hoggaamiya, markaa ka saddexaad waxa uu noqonayaa alifle. Haddii aynu qaadanno qiyaas ah in ciidanku yahay 30,000, aliflayaashu waxay noqon karaan 3,000, halka xadhiglayashuna ay noqonayaan 3,336.

Marka la isku wada daro gaashaandhigga sare, waxa ay noqonayaan 28, halka jannaanada dalku ay noqonayaan 14 jannaan. Habkaas haddii darajooyinka loo maareeyo, wixii ka hadhay waxay noqonayaan hoggaanno ama khibrado kale. Sidaa darteed, haddii nidaamkan la raaco, waxa la helayaa ciidan dhinac walba ka dhisan oo xeer leh.

Mushaharka ciidanka hadda waa hal milyan, raashinkuna waa $50, marka la isku darona waa 43 milyan. In kasta oo aan isleeyahay ma xuma arrintaasi, haddana waxaan qabaa in wax loogu daro ay habboon tahay. Dhanka darajooyinkana, waxaan soo jeedinayaa in 2.5% loogu daro marka uu askarigu alifle noqdo, sidaasna ay u sii socoto ilaa darajada ugu sarraysa. Dhanka kale, Madaxweynaha oo ah Taliyaha Guud ee Ciidamada Qaranka, waa in si cad loo qeexaa kaalintiisa iyo gunnadiisa haddii ay jirto.

Dhanka mushaharka, waxaan soo jeedinayaa in ciidamada Qaranka ee furinta ku jira mushaharkooda ugu yaraan 2% lagu kordhiyo. Waad mahadsan tihiin.

**Md. Saleebaan Diiriye Barre** *(29min, 52sec):*– Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Awalba Shir-guddoonka, Mudanayaasha iyo Shaqaalaha waxaan ku salaamayaa salaanta Islaamka.

Mudane Guddoomiye, aniga oo ixtiraamaya adiga iyo mudanayaasha kale, runtii waxa aad mooddaa in shaqadeenna ay ku jirto mad-madow. Marka aan ka hadlayo xildhibaanada, waa run waa xildhibaano la soo doortay, inta joogtana waa wakiil ka ah inta maqan. Laakiin waxa aynu u baahanahay waa is-ixtiraam iyo in aynu wax badan ka xeerino, maadaama Qaranku maanta ku jiro marxalad aad u xasaasi ah, hawlo badanna ay dayacan yihiin. Mararka qaar xitaa waxaan is idhaahdaa Gole ahaan in la inaga kala diro ayay mudnaan leedahay.

Cidda maanta Qaranka la hadhay, waxa laysku haystaa waa shaqadeenna; waana xeerarka dalka. Cidda qaadata mushaharka si ay u diyaariyaan xeerarka dalka waa innaga. Waxa aynu u baahanahay in aynu is-ixtiraamno, Ilaahay ka baqno, kana fikirno waxa aynu qaadanayno iyo waxa aynu ubadkeenna siinayno. Waa in aynu ka tagnaa qof-jeclaysi iyo koox-jeclaysi. Waan jeclaan lahaa in xildhibaanada badankoodu joogaan, balse waxaan ka xumahay in wax ka yar toban xildhibaan ay joogaan.

Markaan u soo noqdo xeerka hortaal, anagoo eegayna xaaladda taagan iyo xeerkan aynu ka hadlayno, waxa aynu nahay hay'addii ugu horreysay ee u xilsaaran amniga Qaranka.

Waxa aynu nahay cidda la xisaabtami lahayd xukuumadda, cidda u yeedhi lahayd Madaxweynaha, Madaxweyne-ku-xigeenka iyo Wasiirka Gaashaandhigga.

Xeerkan waa xeer aad u muhiim ah. 32 sano ee ay Somaliland jirtay, Ciidanka Qaranku ma yeelan xeer rasmi ah; waxa lagu maamulayay xeer-hoosaadyo ay gudahooda ku heshiiyeen. Ma naqaan sababta darajooyinka u kordhaan, xilalka loo kala qaato, cidda tababar dibadeed loo diro, ama askariga la ganaaxo habka loo maro. Waxa cad in hay'ado badan oo Qaranka ahi ay fadhiid yihiin.

Xeerkan, anigoo u mahadcelinaya guddiga aan ka midka ahay, xildhibaanadii iyo garyaqaanadii soo diyaariyey, waa bilow wanaagsan, maadaama wax hore u jirayba aanu haysan. Hase yeeshee, wax badan ayaa ka maqan. Waxa uu u baahan yahay sharciyaqaano milatari, khubaro maxkamadaha militariga ah iyo khubaro ciidan, maadaama qodobo badan ay isku soo noqnoqonayaan.

Waxaan soo jeedin lahaa, anigoo ka xun in xildhibaano baxaan, in xeerkan loo diro khubaro milatari, lana barbar dhigo xeerar kale oo la mid ah. Qaar ka mid ah qodobada, sida mushaharka, marka la akhriyo waxay u egyihiin kuwo khaldan.

Qodobka 3aad ee xadka lagu dabaqayo xeerkan, waxa ku jira ciidanka badda, cirka iyo dhulka. Sida aynu ognahay, ciidanka badda looguma yeedho ciidan qaran, balse waa ciidanka ilaalada xeebaha, hay'ad gaar ahna way tahay, xeer gaar ahna way leedahay, wasaaradda Arrimaha Gudahana way hoos tagtaa. Sidaa darteed, qodobkani waxa uu u muuqdaa mid ka hor imanaya xeerarka ilaalada xeebaha.

Qodobka qiyamka iyo asluubta Ciidanka Qaranka aad buu u wanaagsan yahay. Tusaale ahaan, Laascaanood 15–16 sano ee u dambeeyay hal kiis oo tacaddi ah laguma diiwaan gelin. Aniguba waxaan ka mid ahaa guddidii daba-galka hantida Qaranka, wax badan baan ka ogahay. Sidaa darteed, qodobkani waa mid mudan in la caddeeyo, gaar ahaan marka laga hadlayo cidda hoggaanka loola jeedo.

Cutubka 2aad ee qaab-dhismeedka Ciidanka Qaranka, waxa uu sheegayaa in ciidanku yeesho Taliye, Abaanduule, Abaanduule ku-xigeen, hoggaanno, qaybo, talisyo iyo guutooyin. Waxaan soo jeedinayaa in laga saaro xarafka Talyaaniga ah ee lagu qoray, lana beddelo A, B ama 1, 2. Qaab-dhismeedka guud waan la qabaa guddida.

Qodobka 8aad, xarafka T, wuxuu sheegayaa in ciidanka badda yahay ciidan qaran, taas oo ka hor imanaysa Qodobka 85aad ee xeerka ilaalada xeebaha Somaliland iyo Qodobkiisa 6aad oo dhigaya in ay hoos tagaan Wasaaradda Arrimaha Gudaha. Sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa in laga saaro.

Qodobka 9aad ee Wasaaradda Gaashaandhigga, faqraddiisa 6aad, waxay ciidanka Qaranka ka dhigaysaa kuwo u xilsaaran khataraha gudaha iyo dibadda labadaba. Sida Dastuurku dhigayo, ciidanka milatariga ah waxa u xil-saaran cadawga dibadda, hase yeeshee waxay ka qayb geli karaan amniga gudaha marka duruufo adag dhacaan oo ay

codsadaan hay'adaha awoodda u leh. Sidaa darteed, qodobkan waxaan soo jeedinayaa in xeerka laga saaro.

Waxaan soo jeedinayaa in Qodobka 13aad, oo qoraya muddada xil-haynta Taliyaha Ciidanka Qaranka, meesha laga saaro. Mudanayaal, marka laga hadlayo muddada xil-haynta Ciidanka Qaranka, ciidanku ma aha xisbi qaran, mana aha hay'ad dimuqraadi ah; waa milatari. Marka milatari laga hadlayo, ma jiro wax la yidhaa muddo go'an ayuu xilka haynayaa. Sidaa awgeed, in la yidhaahdo Taliyaha Ciidanku waxa uu xilka haynayaa shan sano ma aha mid sax ah, waxaana qabaa in qodobkaasi uu gaf ku yahay Ciidanka Qaranka.

**Qodobka 16aad**, ee warbixinta Golaha Wakiillada, waxa uu dhigaya in sanad walba bilowgiisa Wasiirka Gaashaandhigga iyo Taliyaha Ciidanka Qaranku ay horyimaadaan Guddida Arrimaha Gudaha iyo Difaaca ee JSL, kana warbixiyaan xaaladda difaaca iyo amniga dalka, si waafaqsan Qodobka 53aad, faqraddiisa 7aad ee Dastuurka. Waxaan ku dari lahaa qodob labaad oo ah: marka ay u baahdaan Guddida Amniga iyo Arrimaha Gudaha ee Golaha Wakiillada JSL, waa in ay u yimaadaan oo aanay diidin, sidii hore u dhacday.

**Qodobka 19aad**, ee xilka iyo waajibaadka shaqo ee Ciidanka Qaranka JSL, waxaad mooddaa in ay isku dhaw yihiin waajibaadka Taliyaha Ciidanka iyo waajibaadka guud ee Ciidanka Qaranka. Waajibaadka Ciidanka Qaranku waa kuwo ku waajib ah askari kasta oo ka tirsan ciidanka, sidaa awgeed qodobadani waxay u baahan yihiin in si cad loo qeexo, maadaama ay noqonayaan xeer muddo dheer jira. Faqradda 5aad ee la wadaagidda xogta khatarta taagan, Ciidanka Qaranku sida aynu ognahay waxay leeyihiin hay'ado sirdoon iyo hoggaan sirdoon oo xogta ciidanka raadiya, balse halkan waxba laguma xusin marka laga reebo qodobkaas.

Waxaan soo jeedinayaa in qaybta hoggaanka sirdoonka Qaranka si cad loogu daro qodobkan, sidoo kalena la caddeeyo hoggaamada ku qoran iyo qaab-dhismeedka Ciidanka Qaranka.

Faqradda 8aad, oo ka hadlaysa in iyada oo lala kaashanayo Wasaaradda Arrimaha Dibadda la sameeyo xidhiidh wanaagsan oo lala yeesho Wasaaradda Gaashaandhigga iyo Ciidamada Qaranka ee waddamada deriska ah iyo kuwa kale ee beesha caalamka, oo ay ku jiraan iskaashi difaac iyo amni, micnaheedu waa in xog la wadaagi karo. Waxaan ku dari lahaa in la wadaago xogta sirdoon, iyada oo lala kaashanayo hoggaanka sirdoonka Ciidanka Qaranka, iyadoo la ogyahay in madaxda ugu sarreysa ay yihiin Madaxweynaha iyo Taliyaha Ciidanka Qaranka.

Waxa jira ciidan la shaqeeya dalal kale oo ah ciidan dhar cad ah, xitaa aan dirays qaadan. Sidaa awgeed, waxaan u baahan nahay in aynu si cad u qeexno qaabka aynu ula macaamilayno waddamada deriska ah: maxaa inaga dhexeeya Jabuuti, maxaan wadaagnaa, maxaynu uga baahanahay Itoobiya, maxaynu wadaagnaa, maxaase kala leenahay. Marka badda laga hadlayo, maxaa inaga dhexeeya Yemen, maxaan wadaagnaa,

maxaa inagu gaar ah, maxaase iyaga u gaar ah. Waa in aynu ka shaqaynaa danta dalkeenna, ee aanan ka shaqayn danta dal kale.

**Qodobka 26aad**, ee xuquuqda iyo mushaharka xubnaha Ciidanka Qaranka, faqraddiisa 7aad, waxa uu dhigaya in askari lagu helo dembi kama dambays ah oo lagu xukumo xadhig laga jaro mushaharkii joogtada ahaa, mushaharkii darajada, gunnooyinkii, saadka, daryeelka daawooyinka iyo gurigii ciidanka ee uu deggenaa inta uu xabsiga ku jiro. Micnaheedu waxa uu noqonayaa in dambiga askarigu galay lagu ciqaabayo xaaskiisii, carruurtiisii, waalidkiisii iyo cid kasta oo uu masuul ka ahaa. Waxaan qabaa in dambiga askariga iyo xuquuqda ehelkiisu ay laba qodob oo kala duwan yihiin.

Waxaan soo jeedinayaa in qodobkan meesha laga saaro. Askariga dambiga galay waa in dambigiisa lagu qaadaa, hase yeeshee waa in la siiyaa xuquuqdiisa si maatida iyo dadka uu masuulka ka ahaa ay u helaan wixii ay xaqa u lahaayeen, waana waajib saaran Taliyaha Ciidanka Qaranka. Carruurta iyo ehelka askariga waa in la siiyaa xuquuqdooda.

Waxa kale oo jira askartii ku dhimatay jiidda dagaalka, gaar ahaan kuwii ku dhintay 27/08/2023, kuwaas oo xuquuqdoodii laga jaray 30-kii bisha. Askari goob dagaal ku dhinta ama xanuun ku dhinta, xuquuqdiisu waa inay noqotaa mid la mid ah. Waxaan soo jeedinayaa in aan mushaharkiisa laga jarin. Ninka dhintay isaga oo 60 jir ah, carruurtiisuna ay yihiin 5–6 jir, ma aha in lagu yidhaahdo gurigii ciidanka ka bax iyo mushaharkii waa laga jaray. Dawladdu waa inay kafaalo qaaddaa carruurtaas yar-yar, waxbarashadooda iyo noloshoodaba. Waxaan qabaa in dhammaan askartii ku dhimatay loo soo celiyo xuquuqdoodii laga jaray.

Waxaan soo jeedinayaa in lagu daro qodob sheegaya in askariga dhaawacmay ee u dhaawacmay dalkiisa iyo dadkiisa aanu mutaysan in cidlo lagu tuuro. Waa in daawo loo raadiyaa, haddii dalka gudihiisa lagu dawayn kari waayana dibadda loo diro, sidoo kalena ehelkiisa la daryeelo. Taasi waa masuuliyad saaran Wasiirka Gaashaandhigga, Taliyaha Ciidanka Qaranka iyo guud ahaan Qaranka Somaliland.

**Qodobka 27aad**, nidaamka mushahar-bixinta Ciidanka Qaranka, waxaan qabaa in gebi ahaanba la beddelo. Mushaharrada ha noqdaan sida soo socota: Sareeye Guud mushahar u dhigma Wasiir, Sareeye Gaas mushahar u dhigma Wasiir, Sareeye Guuto mushahar u dhigma Agaasime Guud, Admiral Guuto mushahar u dhigma Sareeye Guuto. Mushaharka Wasiirku waa 17 milyan. Agaasimaha Guud mushaharkiisu waa 1 milyan, balse waxa uu leeyahay gunno u dhaxaysa 8 ilaa 12 milyan. Xeerkan gunooyinkaas laguma xusin. Kornayl buuxa ama gaashaanle sare in la siiyo hal milyan waa gaf ku ah Ciidanka Qaranka.

Waxaan soo jeedinayaa in mushaharka saldhigga ah ee ciidanka laga dhigo mid ku salaysan xeerka shaqaalaha dawladda (A-da), dabadeedna lagu daro gunooyinka, dalacaad walbana loogu daro si nidaamsan.

Mushaharka ciidanka haddii la kordhinayo, waa in loo kordhiyaa Ciidanka Qaranka oo keliya. Dalacaaddu waa in ay ku timaaddaa darajada uu askarigu xaqa u leeyahay, iyadoo

ay qoondeeyaan Wasiirka Gaashaandhigga iyo Taliyaha Ciidanka Qaranka, kana hoos imanaysa habraac cad iyo guddida darajo-bixinta heer qaran.

Waxa kale oo jira **Qodobka 28aad**, shaqo qaran. Waxaan soo jeedinayaa in barnaamijka shaqo qaran loo qaato sida dalal badan u qaataan. Arday kasta oo ka baxa dugsi sare waa inuu galaa laba sano oo shaqo qaran ah iyo difaac qaran, sida ay ahaan jirtay dawladihii hore. Muwaadin kastaa waa inuu noqdaa askari kayd ah oo marka loo baahdo la adeegsan karo, tababar dhamaystiranna la siiyo. Kadibna wuu geli karaa jaamacad, wuu ku biiri karaa ciidanka ama shaqo gaar ah wuu aadi karaa, isagoo weli ah askari kayd ah.

**Qodobka 31aad**, shaqaalaha rayidka ah ee Ciidanka Qaranka, waxaan soo jeedinayaa in gebi ahaanba meesha laga saaro. Sirta Ciidanka Qaranka in ay rayid gacanta u gasho sax ma aha. Qof farsamo ahaan laga maarmi waayo waa in heshiis cad lala galaa Wasaaradda Gaashaandhigga, heshiiskaasina aanu marin Hay'adda Shaqaalaha Dawladda, si sirta muhiimka ah loo ilaaliyo.

**Qodobka 33aad**, hawl-gabka Ciidanka Qaranka, oo dhigaya 60–65 sano, waxaan soo jeedinayaa in hawl-gabka laga dhigo 70 ilaa 75 sano, isla markaana askariga hawl-gabka noqda lagu daro lifaaq heegan ah si marka loo baahdo loo adeegsan karo, tababar iyo farsamona looga faa'iidaysto.

**Qodobka 34aad**, cabashada shaqada iyo racfaanka, waxaan soo jeedinayaa in gebi ahaanba meesha laga saaro. Askari Qaran laguma dacwayn karo maxkamad shacab isaga oo dirayskiisa sita. Dacwaddiisa waxa qaada maxkamadda milatariga, waxaana lagu xiraa xero ciidan, ee ma aha saldhig boolis.

Nidaamka darajo-bixinta ee **Cutubka 6aad** ee Ciidanka Qaranka, xeerkan waxa uu u celinayaa Madaxweynaha Qaranka, arrintaasina sax ma aha. Ilaa darajada Alifle, Madaxweynaha Qaranku ma bixiyo darajooyinka; Madaxweynaha waxa uu bixiyaa oo keliya saraakiisha sare ama ugu sarreeya Ciidanka Qaranka. Saraakiisha hoose ee ciidanka, sida aynu ognahay, waxa soo diyaariya saraakiishooda tooska u xukuma: Taliyeyaasha ururrada, Taliyeyaasha guutooyinka, Taliyeyaasha qaybaha, sidaasna ayay ugu gudbaan Taliyaha Guud ee Ciidanka Qaranka, ka dibna la-tashi lala yeesho saraakiisha ku shaqada leh ayaa darajooyinka lagu bixiyaa.

Waxa kale oo jira nidaam kale oo lagu dalacsiiyo, sida askarta imika ka timid Sool ee ku sugan Oog, kuwaas oo la siinayo hal darajo. Sidoo kale, Wasiirka ama Madaxweynaha Qaranku waxa ay si gaar ah u bixin karaan dalacsiin, abaalmarin, bilad ama sharaf kale, taas oo ah arrin caadi ah. Laakiin habka saxda ahi waa in askariga la dalacsiinayo ama la abaalmarinayo uu soo diyaariyo Taliyihiisa Guutada, kadibna loo gudbiyo Taliyaha Qaybta, Taliyaha Guud ee Ciidanka Qaranka, Wasaaradda Gaashaandhigga, halkaasna lagu sharfo askariga.

Xeerka Daryeelka Ciidanka, **Qodobka 44aad**, waxa ku jira saraakiisha Ciidanka Qaranka ee ku dhintay iyaga oo ku jira shaqo qaran, balse aan helin xuquuqdoodii, carruurtoodiina

aan helin wixii ay ka tageen. Qodobka xaqsiinta Ciidanka Qaranka waxa uu ka kooban yahay saddex qodob; waxaanan ku soo kordhin lahaa **farqad 4aad** oo odhanaysa: "Saraakiisha Ciidanka Qaranka ee ku dhinta hawl-gal iyaga oo ku jira shaqo qaran waa in la siiyaa xuquuqdooda buuxda, lana siiyo carruurtooda iyo ehelkooda magdhowga ay xaqa u leeyihiin."

Mudane Guddoomiye, waxaan soo jeedinayaa in xeerkan uu u baahan yahay in lala tashado **khubaro milatari iyo garyaqaanno**. Waa bilow wanaagsan, waan uga mahadcelinayaa Guddoomiyaha Guddida aan ka midka ahay, hase yeeshee wax badan baa ka dhiman, waxaana habboon in khubaro milatari loo diro.

**Md. Xasan Axmed Cilmi (Xasan Kayse)** *(10min, 45sec): –* Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, dhammaantiin waan idin salaamayaa; Assalaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatuh.

Intaa ka dib, anigoo qiraya in xeerkan Ciidanka Qaranka si weyn looga soo shaqeeyay, waxaan jeclahay inaan ka hadlo qodobo kooban oo aan u arko inay muhiim yihiin. Xeerarka aynu samayno ama nala keeno, inta badan cidda loogu talagalay uguma dhaqmaan sida loogu talagalay. Xeerku wuu yimaadaa Golahaa, waa la ansixiyaa, balse marka la eego fulintiisa, Wasaaradaha iyo Hay'adaha uu khuseeyo marar badan kama shaqeeyaan. Sidaa awgeed, waxaan rajaynayaa in xeerkan uu noqdo mid shaqeeya oo la taaban karo, ee aanu noqon waraaq keliya.

Qodobka 5aad ee qiyamka iyo asluubta xubnaha Ciidanka Qaranka JSL, faqraddiisa 5aad iyo 6aad, waxay ka hadlayaan ka madax-bannaanida loollanka siyaasadeed iyo ka fogaanshaha kala-qaybsanaanta iyo takoorka. Si gaar ah, faqradda 5aad, waxa jirta arrin dhacda oo ah in mararka qaarkood Ciidanka Qaranka lagu khasbo inay u codeeyaan xisbi ama musharrax gaar ah. Taasi waa xadgudub ku ah xorriyadda iyo asluubta askariga. Sidaa awgeed, waxaan soo jeedinayaa in lagu daro **faqradda 7aad** oo odhanaysa: "Xubin ka tirsan Ciidanka Qaranka laguma khasbi karo inuu u codeeyo xisbi ama musharrax gaar ah."

Cutubka 3aad, faqraddiisa 6aad, waxaan saxayaa qalad qoraal ah, anigoo beddelaya erayga "ka" una rogaya "ku".

Qodobka 10aad, oo ka hadlaya Madaxweynaha oo ah Taliyaha Guud ee Ciidanka Qaranka, faqraddiisa 7aad, waxa uu siinayaa awood cafis. Waxaan soo jeedinayaa in lagu daro in Madaxweynaha aanu cafin karin qof maxkamad milatari ku xukuntay **dil**.

Faqradda 8aad ee isla qodobkaas, ee ka hadlaysa ku dhawaaqista xaalad deg-deg ah, waa in la waafajiyaa Qodobka 92aad ee Dastuurka, kaas oo dhigaya in xaalad deg-deg ah lagu dhawaaqo kaddib marka Golaha Wakiilladu oggolaadaan.

Qodobka 19aad, ee waajibaadka Ciidanka Qaranka, waxaan ku darayaa **faqradda 9aad**, oo ah ka-qayb-galka dhoollo-tusyada milatari iyo carbisyada ay sameeyaan dalalka aynu saaxiibka nahay.

Cutubka 4aad, Qodobka 21aad ee shaqo-qorista, waxaan ku darayaa **faqradda 5aad** oo odhanaysa in ciidanka laga soo xulo dhammaan deegaannada iyo tuulooyinka dalka, maadaama ay jiraan dad leh geesinimo iyo astaamo askarinimo oo ka maqan fursadaha hadda jira.

Qodobka 23aad ee tababarada, faqraddiisa 5aad, waxaan ku darayaa in xulashada tababarada dibadda loo maro **si caddaalad ah**.

Qodobka 27aad ee nidaamka mushahar-bixinta, faqraddiisa 4aad, oo sheegaysa in Admiral Guuto uu mushahar la mid ah Sareeye Guuto helo, waxaan qabaa in Admiral-ku ka sarreeyo Sareeye Guuto, sidaa awgeedna uu u qalmo mushahar u dhigma Wasiir.

**Md. Cabdilaahi Muuse Cabdi** *(12min, 14sec): –* Mudane Guddoomiye, Xildhibaannada iyo Shaqaalaha Golaha; ASC.

Anigu faahfaahinta xeerka ma gelayo, balse waxaan ka hadlayaa lifaaqii Guddida ee sheegay in aanay suurtagal u noqon in ay la kulmaan Wasaaradda Gaashaandhigga. Xeerkan waa xeer si toos ah u khuseeya Wasaaradda iyo Ciidanka Qaranka, sidaa awgeed haddii aan lala tashan, wax badan baa ka dhimanaya. Waxaan soo jeedinayaa in inta naaqishadda xeerku socoto, Shir-guddoonku ay marti-qaadaan Wasaaradda Gaashaandhigga iyo Taliska Ciidanka Qaranka, si ay warbixin iyo aragti uga dhiibtaan xeerkan.

**Guddoomiye Faratoon:** Mudanayaal, soo-jeedinta uu Xildhibaan Cabdilaahi soo jeediyay waa mid wanaagsan. Anaguna waanu isku daynaynaa, annagoo Guddidana la socodsiinayna wixii ka soo baxa.

Mudanayaal, aad iyo aad ayaan ugu mahadnaqayaa dhammaan intii u dhabar-adaygtay dhagaysiga dooddan. Halkaas ayaynu maanta ku soo af-jaraynaa fadhigeenna; doodduna way sii socon doontaa maalinta berri ah haddii Alle idmo. Fadhiguna wuu inoo xidhan yahay. **WSC.**

**Md: Faysal Yusuf Jamac** *(9min 36sec):-* Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Waad mahadsan tahay, Mudane Guddoomiye. Kolay Guddoomiye, xeerkan wax badan ayaa ka dhiman marka la eego fikrad ahaan. Aniguna waxaan ku dari doonaa, insha Allaahu tacaalaa, waxyaabo aan u arko in ay u baahan yihiin sixid, maadaama ay jiraan qodobo qaldan oo u baahan in la saxo.

Eray-bixinta ku saabsan **qorista qasabka ah** si fiican uma fahmin. Waxaan jeclaan lahaa in si cad loo qeexo waxa loola jeedo. Sida halkan ku qoran, waxa la yidhi "qorista qasabka ah ee Ciidanka Qaranka oo qasab ah", taas oo salka ku haysa xeer ay ansixiyeen Golaha Wakiilladu. Hase yeeshee, bogga labaad ama saddexaad ee qorista qasabka ah anigu si buuxda uma fahmin waxa loola jeedo, sidaa awgeed waa in la caddeeyaa.

Bogga saddexaad, erayga **miino dhulka** waxa loola jeedaa waxyaabaha qarxa ee yaalla dhulka dushiisa ama hoostiisa si loogu waxyeelleeyo baabuurta ama dadka. Miinadu qof kasta oo dulmara way waxyeellaysaa, sidaa awgeed halkaasi sixid ayay u baahan tahay.

Bogga shanaad, erayga **hawl-gab** waxa loola jeedaa askari ka tirsan Ciidanka Qaranka oo shaqadii ka fariistay ama ka tagay shaqada, sidaa awgeed halkaasna waan jeclaan lahaa in la saxo.

Waxaan kaloo jeclaan lahaa in la habeeyo **qaabka qoraalka qodobbada iyo cinwaannada**, maadaama ay isku dhinac yaallaan. Haddii hoos loo kala dhigo, xeerku wuu qurux badnaan lahaa. Tusaale ahaan, Qodobka 1aad marka la qorayo magaca xeerka, waxa habboon in hoos loo dhigo, maadaama dhammaan xeerku sidaa u wada qoran yahay.

Cutubka 2aad, Qodobka 8aad, waxa ku qoran qaab-dhismeedka Ciidanka Qaranka JSL, oo ay ka mid yihiin: Taliye, Abaanduulaha 1aad, Abaanduulaha 2aad, hoggaan, qaybo iyo guutooyin hoos taga taliska, kuliyado iyo dugsiyo tababar. Waxa kale oo ku qoran in Ciidanka Qaranku ka kooban yahay Ciidanka Dhulka, Ciidanka Badda (Navy) iyo Ciidanka Cirka (Air Force). Anigu waxaan filayaa, sida xogta aan hayaa sheegayso, in Ciidanka Badda aanu hadda hoos iman Wasaaradda Gaashaandhigga.

Ciidanka Qaranku waxa uu leeyahay ciidan joogto ah iyo ciidan kayd ah. Maaddaama ay tani tahay qaab-dhismeedka ciidanka, waxaan jeclaan lahaa in la dhamaystiro, waayo waxyaabo badan baa ka dhiman.

Qaab-dhismeedka ciidanku waa in si cad loo qeexaa, oo la yidhaahdo waxa uu ka kooban yahay unug, koox, urur, guuto, qayb, iyo wixii la mid ah, iyo sidoo kale hawlahooda difaac, farsamo iyo tikniko. Qodobadan waa in lagu daraa si loo helo xeer dhamaystiran.

Qodobka 10aad, faqraddiisa 8aad, oo ka hadlaysa Madaxweynaha oo ah Taliyaha Guud ee Ciidanka Qaranka, waxa ku qoran hoggaaminta xaaladaha dagaalka iyo ku dhawaaqista xaalad degdeg ah. Waxaan jeclaan lahaa in lagu daro in arrintaasi ay ku xirnaanayso **oggolaanshaha Baarlamaanka**. Dagaalkii imika la qaaday Baarlamaanku muu oggolaan, taasina waxay ahayd khalad. Hadda mar kale waxa la maqlayaa durbaan dagaal oo la tumayo, sidaa awgeed waa in Baarlamaanka ansixiyo.

Dawladaha caalamka waxa ay ku dhaqmaan nidaamkan ah in Baarlamaanku oggolaado xaaladaha degdegga ah, Madaxweynaha ayaana codsada.

Qodobka 15aad, u-warbixinta Golaha Wakiillada, waxa ku jira qalad qoraal ah (typing error) oo ah "Guddida amniga iyo arrimaha gudaha". Waa in laga dhigo **Guddida Arrimaha Gudaha iyo Amniga**.

Sidoo kale, marka la yidhaahdo Wasiirka Gaashaandhigga iyo Taliyaha Ciidanka Qaranka waa in ay hortagaan guddida, waa in si sax ah loo yidhaahdo Guddida Arrimaha Gudaha iyo Amniga. Halkaa qalad qoraal ayaa jira waana in la saxo.

Ugu dambayn, anigoo ku soo laabanaya eray-bixinta, waxa jira erayga **hawl-gab** oo faqraddiisa saddexaad laba jeer ku soo noqday. Mid ka mid ah waxa loola jeedaa gunno bille ah oo lagu jaangooynayo darajada iyo muddada shaqada ka dib marka xubin ka mid ah Ciidanka Qaranku hawl-gabto. Sidaa awgeed, waxaan soo jeedinayaa in labadaa eray midkood loo beddelo **gunno hawl-gab**.

Waxa kale oo jira qaabka mushaharka loo qoray. Waxaan jeclaan lahaa in si cad loo qeexo. Marka la yidhaahdo "Sareeye Guuto mushahar Wasiir", mushaharka Wasiirku imisa ayuu yahay? Anigu si cad uma aqaan. Sidaa awgeed, waa in la qeexaa mushaharka askariga, in la yidhaahdo waa intaa iyo intaas, inkasta oo ay noqon karto arrin sir ciidan. **WSC.**

**Md. Abiibokor Siciid Cali** *(7min, 39sec):–* Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Mudane Guddoomiye, Mudanayaal, Shaqaalaha Golaha iyo Saxaafadda; Assalaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatuh.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, waxaan doodayda ku bilaabayaa magaca xeerka. Marka la akhriyo magaca xeerka iyo Qodobka 10aad, waxaad dareemaysaa in ay wax iska hor imanayaan. Qodobka 10aad waxa uu dhigaya in Madaxweynaha uu yahay Taliyaha Guud ee Ciidamada Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland, "oo ay ku jiraan Ciidanka Qaranka". Halkaa waxaad ka dareemaysaa in aanu jirin sifayn gaar ah, maadaama dhammaan ciidamada Qaranku yihiin ciidan qaran, ha ahaato Boolis, Ciidanka Badda, Dab-damiska ama Taraafikada.

Sidaa awgeed, waxaan soo jeedinayaa in si gaar ah loo yidhaahdo **Ciidanka Difaaca Qaranka**, si loo helo sifayn cad.

Bogga labaad ee eray-bixinta, iyo marka lala akhriyo qaab-dhismeedka ciidanka ee bogga saddexaad, Qodobka 8aad, waxa ku qoran Abaanduulaha 1aad iyo Abaanduulaha 2aad. Hase yeeshee, marka xeerka la sii akhriyo, waxaad arkaysaa in ay leeyihiin shaqooyin kala duwan. Sidaa awgeed, waxaan soo jeedinayaa in eray-bixinta lagu caddeeyo in Abaanduulaha 1aad yahay ku-xigeenka Taliyaha ee hawl-gallada, halka Abaanduulaha 2aad uu yahay ku-xigeenka Taliyaha ee arrimaha maamulka.

Qodobka 22aad, faqraddiisa 2aad, shuruudaha shaqo-qorista, waxa ku qoran in uu yahay 18 jir ama ka weyn. Hase yeeshee, marka lala akhriyo Qodobka 33aad ee shaqo-ka-saarista iyo hawl-gabka, waxa ku jira is-khilaaf u baahan in la saxo. Si loo helo nidaam cad, waxaan

soo jeedinayaa in da'da hawl-gabku noqoto 57 ragga iyo 47 dumarka, si askarigu ugu yaraan saddex sano Qaranka ugu shaqeeyo.

Qodobka 25aad, faqraddiisa 2aad, waxa ku jira qalad qoraal ah oo ah "xubana" halkii ay ka ahaan lahayd "xubnaha", waana in la saxo.

Qodobka 26aad, xuquuqda iyo mushaharka, faqraddiisa 11aad, waxa ku qoran waxbarashada carruurta ilaa heer dhexe. Waxaan ku dari lahaa in **dugsiga sare** sidoo kale bilaash noqdo.

Ugu dambayn, Qodobka 34aad iyo Qodobka 48aad labaduba waxa ay ka hadlayaan cabashooyinka, sidaa awgeed waa in la is-waafajiyaa. Aad iyo aad ayaad u mahadsan tihiin. **WSC.**

**Md. Maxamed Abiib Yuusuf** *(30min, 54sec):-* Mudane Guddoomiye, Mudanayaal, Hawl-wadeenada Golaha, Warbaahinta iyo dhammaan Shacabka Jamhuuriyadda Somaliland, Assalaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatuh.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, ugu horrayn waxaan bogaadinayaa curinta xeerkan, maadaama uu muhiim u yahay dhismaha hay'ad ka mid ah hay'adaha ugu muhiimsan ee astaan u ah jiritaanka dawladnimo, gaar ahaan Ciidanka Qaranka.

Iyadoo aynu ognahay in muddo dheer aynu ka dhaxalnay maqnaanshaha xeer rasmi ah oo nidaamiya Ciidanka Difaaca Dalka, isla markaana aynu markhaati ka nahay xaaladda uu maanta ku sugan yahay Ciidankeennu, waxaan soo jeedinayaa in xeerkan la siiyo mudnaanta uu mudan yahay, lana saaro guddi gaar ah oo si qoto dheer u darista xaaladda ciidanka, si xeerka inaga soo baxaa u noqdo mid daweeya, daboolana dhammaan god-daloolooyinka maamul, maaliyadeed, hoggaamineed, farsamo iyo awoodeed ee ciidanka.

Haddaba, aniga oo ka duulaya **Qodobka 26aad, farqaddiisa 1aad** ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada (Xeer Lr. 01/2021) iyo mabaa'di'da la xidhiidha Ciidanka Qaranka, markii aan akhriyey qabyo-qoraalka Xeerka ay soo gudbisay Guddidu, isla markaana aan ogsoonahay muhiimada uu leeyahay Xeerkan, waxaan Golaha la wadaagayaa doodayda ku saabsan Xeerka.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, ugu horrayn waxaan bogaadinayaa curinta Xeerkan oo aan u arko in uu muhiim u yahay dhismaha hay'ad ka mid ah hay'adaha ugu muhiimsan, isla markaana astaan u ah jiritaanka dawladnimo, taas oo ah **Ciidanka Qaranka**.

Inaga oo ogsoon in aynu ka dhaxalnay maqnaanshaha Xeerka Ciidanka Difaaca Dalka (Ciidanka Qaranka), isla markaana aynu markhaati ka nahay xaaladda uu maanta ku sugan yahay Ciidankeennu, intaanan gudo gelin doodayda waxaan soo jeedinayaa in Xeerkan la siiyo mudnaanta uu mudan yahay, lana saaro **guddi gaar ah** oo daraaseeya marxaladda uu

ku sugan yahay Ciidanku, si xeerka inaga soo baxaa u noqdo mid daweeya isla markaana daboola god-daloolooyinka maamul, maaliyadeed, hoggaamineed, farsamo iyo awoodeed ee ciidanka.

Haddaba, aniga oo mar kale ka duulaya **Qodobka 26aad, farqaddiisa 1aad** ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada (Xeer Lr. 01/2021) iyo mabaa'di'da la xidhiidha Ciidanka Qaranka, markii aan akhriyey qabyo-qoraalka Xeerka ay soo gudbisay Guddidu, isla markaana aan ogsoonahay muhiimada uu leeyahay Xeerkan, waxaan Golaha la wadaagayaa doodayda ku saabsan Xeerka.

**Faahfaahinta doodayda:** Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, waxaan jeclahay in aan si guud idiinku soo koobo qaybaha aan dul istaagi doono ee sal-dhigga u ah doodayda, kuwaas oo aan doonayo in Xeerkan uu koobsado isla markaana si faahfaahsan uga hadlo. Qaybahaasi waa:

- Taariikhda iyo sooyaalka Ciidanka
- Magaca Xeerka
- Astaanta iyo dirayska Ciidanka
- Nidaamka shaqo-qorista iyo kaydinta xogaha ciidanka
- Nidaamka maamulka maaliyadda
- Darajo-bixinta iyo dalacsiinta
- Ruqsadaynta iyo anshax-marinta Ciidanka
- Xaqsiinta iyo hawl-gabka Ciidanka
- Nidaamka difaaca iyo hawl-galinta Ciidanka
- Qaabka xulashada hoggaanka Ciidanka
- Nidaamka wada-shaqaynta Ciidanka iyo Wasaaradda Gaashaandhigga
- Agabka iyo saanadda Ciidanka
- Ciidamada kaydka
- Xidhiidhka dibadda ee Ciidanka Qaranka
- Miisaaniyadda Ciidanka
- Mushaharrada iyo gunnooyinka

Aniga oo ka duulaya mudnaanta iyo ahmiyadda uu leeyahay Xeerkan, isla markaana aan darsay nuxurka qaybaha kala duwan, waxaan garwaaqsaday in ay ka maqan yihiin ama aanay ku filnayn faahfaahinta ka muuqata qaybo badan oo Xeerka ka mid ah.

Haddaba, Mudanayaal, aniga oo ka duulaya qodobada kor ku xusan, waxaan mid mid isugu soo bandhigi doonaa god-daloolooyinka iiga soo baxay qabyo-qoraalkan ina hor yaalla, kuwaas oo ay ahayd in uu daboolo, balse nasiib-darro aan u arko in aan la siin mashruucan ahmiyaddii uu mudnaa.

**God-daloolooyinkaMashruuca:** Xeerkani waxa uu leeyahay god-daloolo la xidhiidha arrimo muhiim u ah Ciidanka, kuwaas oo ay ka mid yihiin:

- Xeerku uma qaabaysna si waafaqsan hab-qoraalka xeerarka iyo kala-horraynta cutubyada iyo qaybaha.
- Ma faahfaahinayo hab-raaca dejinta miisaaniyadda ciidanka, lahaanshaha iyo maamulidda hantida gaarka ah, nidaamka qandaraas-bixinta, baadhista iyo hanti-dhowrka, doorka hay'adaha kale ee maaliyadeed, nidaamka deeqaha, daymaha iyo warbixinta xisaabaadka.
- Hannaan cad oo lagu diiwaangeliyo laguna kaydiyo xogta ciidanka iyo saanaddooda ma jiro.
- Xeerku ma dhisayo nidaamka lagu qaadanayo xubnaha cusub, kaydka ciidanka iyo hawl-wadeennada aan ciidan ahayn ee gudanaya xilal gaar ah.
- Ma jidaynayo hab-raaca anshax-marinta gefafka ciidanka, ruqsadaynta iyo xuquuqaha guud.
- Ma qaabaynayo nidaamka garsoorka ciidanka, oogista dacwadaha aan ciqaabta ahayn iyo maxkamadda awoodda u leh.
- Ma faahfaahinayo xil-qaadashada ciidanka ee hawlaha bini-aadannimo iyo doorkooda xilliyada masiibooyinka dabiiciga ah.
- Ma tilmaamayo sida looga faa'iidaysan karo cududda ciidanka ee qaadata ku dhowaad kala-badhtanka miisaaniyadda qaranka, sida ka-qayb-qaadashada wax-soo-saarka beeraha, warshadaha, dhismayaasha, biyo-xidheennada iyo kobcinta xirfadaha.
- Ma faahfaahinayo nidaamka mushaharrada iyo gunnooyinka ciidanka si hufan, isla markaana meesha looga saaro ku gabashada "sir ciidan" si loo dhiirrigeliyo daah-furnaan iyo isla-xisaabtan.
- Ma jaan-goynayo nidaamka hawl-gallada ciidanka ee ka baxsan difaaca xuduudaha, sida ka-qayb-qaadashada hawl-gallo wadajir ah iyo doorka Golaha Wakiillada.

**Soo-jeedin:** Haddaba, aniga oo maanka ku haya god-daloolooyinka kor ku xusan, waxaan soo-jeedinayaa:

- In curinta iyo dhammaystirka Xeerkan la siiyo waqti ku filan, loona diro **akhris 3aad**, lana saaro **Guddi gaar ah (Ad hoc Committee)**.

- In Xeerkan laga dhigo **xeer ballaadhan (Comprehensive Act)** oo buuxiya dhammaan baahiyaha Ciidanka, kuna dhisan daah-furnaan iyo isla-xisaabtan.
- In lala tashado hay'adaha uu Xeerku khuseeyo, gaar ahaan Wasaaradda Gaashaandhigga iyo Taliska Ciidanka, kuwaas oo aan ka qayb-qaadan marxaladihii hore ee diyaarinta.

**Gebogebo:**
Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, waxaan idinka codsanayaa in la igu raaco soo-jeedintayda, maadaama uu Xeerkan leeyahay ahmiyad qaran oo ballaadhan, isla markaana aynu ognahay duruufaha ku gedaaman hawlaha Ciidanka Qaranka.

**Cutubka Kowaad:** Hab-dhigga Cutubka Kowaad ma waafaqsana hab-dhigga xeerarka. Sidaa awgeed, waxaan soo-jeedinayaa:

- In magaca Xeerka loo bixiyo **Xeerka Ciidanka Difaaca Dalka (CDD)**.

**Qodobka 4aad – Mabaa'di'da Xeerka:** In lagu daro:

a) Ku-dhaqanka Shareecada Islaamka.
b) Xil-kasnimo, daacadnimo, waddaniyad, isla-xisaabtan iyo daah-furnaan.
c) Ciidan si heer sare ah loo tababaray oo ilaaliya xuquuqda aadamaha iyo sharafta guud.
d) Ku-dhaqanka xeerarka caalamiga ah iyo kuwa heer gobol.
e) Sugidda iyo difaacidda xuduudaha dalka.

**Qodobka 2aad – Ujeeddooyinka:**

1. In la helo Xeer jidaynaya qaab-dhismeedka, xilka, waajibaadka, nidaamka maamul, maaliyadeed, darajo-bixinta, xaqsiinta iyo hawl-gabka.
2. In la helo Ciidan leh diiwaan rasmi ah, tiradiisuna sugantahay, saanaddiisuna caddahay.
3. In la helo Ciidan leh xirfad iyo aqoon.

**Qodobka 3aad – Xadka Dabaqaadda:** Xeerkan waxa lagu dabaqayaa:

1. Xubin kasta oo ka tirsan ciidanka.
2. Xubin kasta oo ku jirta kaydka, joogto ama is-diiwaangelisay.
3. Qof aan ciidan ahayn balse loo qaatay hawlo ciidan.
4. Kuwa ku jira tababarro loona diyaarinayo ku-biiridda ciidanka.
5. Dhammaan gudashada xilalka, waajibaadka iyo saanadda ciidanka.

**Qodobka 6aad – Astaanta iyo Dirayska:** In lagu daro farqad dhigaysa in Ciidanka Qaranku yeesho **dirays u gaar ah** oo kaga duwan ciidammada kale.

**Qodobka 7aad – Shakhsiyadda Qaanuuniga ah ee Ciidanka Qaranka JSL** Waxaan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan:

1. Ciidanka Qaranku waa hay'ad dastuuri ah oo yeelanaysa shakhsiyad qaanuuni ah, kana yeelan karta noocyada kala duwan ee hantida si waafaqsan xeerka, isla markaana magaciisa wax ku dacwayn karta laguna dacwayn karo.
2. Dacwadaha aan ciqaabta ahayn ee ay dhinac ka yihiin xubnaha Ciidanka Qaranka ama hay'adda Ciidanka Qaranku, waxaa loo raacayaa xeerka madaniga ah, waxaana ka garnaqaya maxkamadda awoodda u leh.

**Cutubka 2aad** oo ka koobnaa hal qodob oo cinwaankiisu ahaa qaab-dhismeedka ciidanka, waxaan soo jeedinayaa in loo faahfaahiyo sida hoos ku xusan, isla markaana loo soo raro **Cutubka 3aad**.

**Qodobka 8aad – Qaab-dhismeedka Ciidanka Qaranka** Ciidanka Qaranku wuxuu yeelanayaa qaab-dhismeedkan soo socda:

1. Madaxweynaha oo ah Taliyaha Guud ee Ciidanka Qaranka
2. Wasiirka Gaashaandhigga
3. Taliyaha Guud iyo ku-xigeennadiisa
4. Golaha Sare ee Ciidanka
5. Taliska Guud oo ay ka hawl-galayaan hoggaanno ay ka mid yihiin:
   a) Hoggaanka hawl-galinta.
   b) Hoggaanka hawlaha ciidanka.
   c) Hoggaanka saadka,
   d) Hoggaanka lacagta
   e) Hoggaanka qorshaynta iyo tababarada.
   f) Hoggaanka xidhiidhka.
   g) Hoggaanka tiknoolajiyadda
   h) Hoggaanka caafimaadka
   i) Hoggaanka hawl-gabka iyo xaqsiinta
   j) Hoggaanka gaadiidka iyo farsamada
6. Agaagag ay ka farcamayaan qaybo iyo guutooyin ciidan
7. Sidoo kale, Ciidanka Qaranku waxa uu ka koobnaan doonaa:
   a) Ciidanka Dhulka
   b) Ciidanka Cirka
   c) Ciidanka Badda
8. Xubnaha Ciidanku waxa ay ka koobnaan doonaan:

a) Ciidanka Joogtada ah (Active Personnel)
b) Ciidanka Kaydka (Reserved Personnel)

9. Iyo qaybaha kale ee ciidanka oo ay ka mid yihiin xarumaha tababarada.

- Waxaa la soo jeediyay in **Qodobka 19aad** ee cinwaankiisu ahaa *Xilka iyo Waajibaadka Ciidanka Qaranka* loo soo raro Cutubkan 2aad.
- Waxaan soo jeedinayaa in **Qodobka 9aad** ee ka hadlaya *Xilka iyo Waajibaadka Wasaaradda Gaashaandhigga* laga soo hormariyo **Qodobka 10aad** ee ka hadlaya *Xilka iyo Waajibaadka Madaxweynaha (Taliyaha Guud ee Ciidanka Qaranka)*.
- **Qodobka 12aad**, oo cinwaankiisu ahaa *Shuruudaha Magacaabista Taliyaha Ciidanka iyo Abaanduulaha*, waxaan soo jeedinayaa in shuruudaha lagu koobo **Taliyaha Ciidanka iyo ku-xigeennadiisa**.
- **Qodobka 15aad** ee ka hadlaya *Xilka iyo Waajibaadka Abaanduulaha Ciidanka Qaranka*, waxaan soo jeedinayaa in lagu beddelo *Xilka iyo Waajibaadka Taliye-ku-xigeennada*.
- Taliye-ku-xigeennada waxaa soo magacaabaya Madaxweynaha.

Taliye-ku-xigeennadu, iyada oo loo kala horraysiinayo darajadooda iyo xilalkooda, waxay buuxinayaan xilka Taliyaha Ciidanka Qaranka:

a) Marka ay bannaanaato ama marka uu maqan yahay
b) Marka uu sababo caafimaad awgood u gudan kari waayo xilkiisa

**Md. Cabdilaahi Yuusuf Axmed** *(09min, 30sec):* – Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Ugu horrayn Shir-guddoonka Golaha Wakiillada, xubnaha Golaha Wakiillada, shaqaalaha Golaha Wakiillada iyo saxaafadda; dhammaantiin Assalaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatuh.

Xeerkan wuxuu ka kooban yahay qodobo. Waxaan saxayaa, tusaale ahaan, **Qodobka 35aad** oo ka koobnaa afar faqradood; faqraddii aan ka saaray iyo faqraddii aan ku daraynа kama bixin mowduuca.

Waxaan is dul-taagayaa dhowr qodob. **Qodobka 27aad, faqraddiisa 10aad**, oo dhigaysa in mushaharka saraakiisha, saraakiil-xigeennada iyo askarta kale lagu soo saaro wareegto Madaxweyne oo waafaqsan xeerka—halkaas mushaharku waa **xuquuq aasaasi ah**. Sidaa awgeed, waxaan ka saaray wareegtada Madaxweynaha, waxaanan ku daray **faqradda 11aad** oo odhanaysa: *Askari dable ah mushaharkiisu kama yaraan karo 2,500,000 (laba milyan iyo shan boqol oo kun) oo shilin Somaliland ah.*

**Qodobka 35aad** oo faqradiisu dhigayaan in dhammaan Ciidanka Qaranku dakhliga ku shubaan Bangiga Dhexe ee Dawladda si loogu bixiyo mushaharkooda iyo xuquuqdooda

kale, arrintaas aad baan u soo dhawaynayaa. Waxaan ku darayaa **faqradda 4aad** oo dhigaysa in dhammaan ciidamada kala duwan—Ciidanka Militariga, Booliska, Sirdoonka, Asluubta, Socdaalka, Dab-damiska iyo Ilaalada Xeebaha—qodobkan lagu dabaqo, si mushahar-bixinta loo casriyeeyo, loogana gudbo lacag-qaadista kiishka, askari walbana uu akoon ku yeesho Bangiga Dhexe, xogtana si ammaan ah loo kaydiyo.

**Qodobka 7aad, faqraddiisa 2aad**, ee ku saabsan dacwadaha madaniga ah iyo kuwa maamul, waxaa ka kaalmeeya Ciidanka Qaranka **Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud**; maadaama Garyaqaanka Guud uu lataliye sharci u yahay xukuumadda, halka dacwadaha madaniga ah ee Qaranka ay masuul ka tahay Xeer-Ilaalinta Guud. Sidaa awgeed, waxaan beddelay faqraddaas.

**Qodobka 15aad** ee xilka iyo waajibaadka Abaanduulaha Ciidanka Qaranka, awoodaha way is-dhaafsan yihiin; sidaa awgeed, waxaan soo jeedinayaa in kala-sarraynta iyo awoodaha si cad loo qeexo.

**Qodobka 26aad** ee waxbarashada carruurta ay dhaleen Ciidanka Qaranka, maadaama waxbarashada hoose bilaash tahay, waxaan ku darayaa **laba faqradood**:
– In deeqaha waxbarasho ee dibadda (Degree-ga jaamacadaha) **50%** loo xiro carruurta Ciidanka Qaranka.
– In carruurta Ciidanka Qaranka waxbarashada ilaa heer jaamacadeed (degree-ga koowaad) **bilaash** laga dhigo, iyadoo qaybinta kharashka lagu saleeyo hay'adaha wax-soo-saarka qaranka, ganacsatada iyo miisaaniyadda Wasaaradda Waxbarashada.

Arrimahan waa farsamo (technical); haddii loo baahdo, khubaro maaliyadeed iyo kuwo kale waa la kaashan karaa. Anigu ma qabo in xeerkan mar kale Guddi gaar ah lagu celiyo, maadaama Golaha ay caado ka noqotay in xeer kasta oo la keeno lagu celiyo *Ad hoc*. Xildhibaanku wixii uu ku kordhin karo ha keeno, doodda ha ka qayb-qaato; Golaha ha laga daayo in mar kasta xeer kasta Guddi gaar ah lagu celiyo.

Wixii khubaro ah ee lagu darayo waan soo dhawaynayaa. **Aad iyo aad baad u mahadsan tihiin.**

**Md. Xuseen Ismaaciil Jaamac (Budul)** **(6min, 10sec):** – Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Mudane Guddoomiye, waad mahadsan tahay. Xeerkan Ciidamada Qaranka ee doodiisu socotay, waxaan ka dhiiban doonaa aragti dhowr qodob ah.

Qodobka 2aad ee Xeerkan, oo ka hadlaya ujeeddooyinka loo sameeyay xeerka, sida uu u qoran yahay ama ay Guddidu u soo diyaarisay, aniga iila muuqata in uu aad u kooban yahay, isla markaana lagu koobay qaab-dhismeedka ciidamada, eraygaasna dib ayaa loogu noqnoqday. Ujeeddooyinka xeerku waxaan qabaa in ay ka ballaadhan yihiin intaa.

Waxaan soo jeedinayaa in ujeeddooyinka xeerka la faahfaahiyo, maadaama sida uu hadda u qoran yahay aanu ku filnayn. Sidoo kale, xadka ku-dhaqanka xeerkan, xeerku waxa uu sheegay in lagu dabaqayo dhammaan Ciidanka Qaranka ee kala ah Ciidanka Dhulka,

Badda iyo Cirka ama Hawada. Markay sidaa tahay, waxaan u fahmayaa in ay khusayso askarta, dablayda, saraakiisha iyo saraakiil-xigeennada. Hase yeeshee, waxa jira shaqaale rayid ah oo si toos ah iyo si dadbanba ula shaqeeya ciidamada. Sida loola dhaqmayo iyaguna waa in xeerku bayaamiyaa, taasina waa meel xeerku ka qabyo yahay oo u baahan faahfaahin.

Qaab-dhismeedka xeerku, faqraddiisa 2aad, waxa lagu sheegay in Ciidanka Qaranku ka kooban yahay Ciidanka Dhulka, Ciidanka Cirka iyo Ciidanka Hawada. Sidaa darteed, xeerku si gaar ah uma tilmaamin astaamaha gaarka ah iyo sifooyinka Ciidamada Badda iyo Cirka, inkasta oo ciidamadu leeyihiin astaamo kala duwan. Astaanta keliya ee xeerku tilmaamay waa midda hadda isticmaalaan Ciidanka Dhulka. Sidaa awgeed, waxaan tabayaa in aan meelna laga sheegin labadaas ciidan ee kale, taas oo u baahan in lagu daro.

Qodobka 11aad ee xeerkan, Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga, waa xil masuuliyadeed. Waajibaadka iyo masuuliyadaha wasiirka ayaa hoos lagu taxay, balse waxa ka maqan cinwaankii (Title-kii) qodobka. Sidaa awgeed, waxaan filayaa in lagu saxo in lagu magacaabo **"Awoodaha iyo Masuuliyadaha Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga."**

Mudane Guddoomiye, halkan waxaan ku soo jeedinayaa laba qodob oo aan u arko inay muhiim tahay in lagu daro xeerkan:

- In la sameeyo **Golaha Difaaca Qaranka**, kaas oo xeerku si cad u tilmaamo. Golahaasi waxa uu ka koobnaan karaa shan xubnood: Wasiirka Gaashaandhigga, Taliyaha Xoogga Dalka, Taliyaha Ciidanka Badda, Taliyaha Ciidanka Cirka iyo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Gaashaandhigga.
- Golaha Difaaca Qaranku waxa uu yeelanayaa masuuliyado, kana qayb qaadan kara hanaanka shaqada Wasaaradda Gaashaandhigga iyo Ciidanka Qaranka, xasilinta khilaafaadka iman kara, talo-bixinta hawl-gallada, tababarada, qaab-dhismeedka iyo guud ahaan hawlaha ciidamadu fulinayaan.

Waxaan qabaa in Golaha Sare ee Difaaca Qaranka si cad loogu daro xeerkan.

Waxaan kaloo soo jeedinayaa in lagu daro qodob ama cutub gaar ah oo ka hadlaya **anshax-marinta iyo cabashooyinka**, sida ku xusan Qodobada 26aad iyo 27aad ee xeerka. Si guud, waxaan qabaa in ay habboon tahay in lagu daro cutub si gaar ah uga hadlaya akhlaaqda ciidamada, gefafka askariga, amar-diidmada, iyo dhammaan arrimaha la xidhiidha anshaxa ciidanka iyo cabashooyinkooda. Tani waxay noqon kartaa arrin lagama maarmaan ah oo yarayn karta falalka dilalka ah ee mararka qaarkood ka dhex dhaca ciidamada gudahooda.

**Md. Saleebaan Axmed Carab** **(6min, 51sec):** – Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka iyo Xildhibaanada, Assalaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatuh.

Xaqiiqatan, xeerkan ina hor yaalla waa xeer aad u muhiima. Ciidamadu waa astaanta Qaranku leeyahay, astaanta Qarankana in la hagaajiyo inta awoodeennu tahayba waa

waajib inaga saaran. Inkasta oo wax badan ay ka dhiman yihiin oo u baahan faahfaahin iyo in meelaha qaar hore loo sii durko, haddana xeerkan sida uu hadda yahay wax weyn ayuu ka tarayaa, waana mid aan soo dhawaynayo.

Waxaa muhiim ah in la iswaafajiyo lana isku hagaajiyo waxyaabaha aynu doonayno in ciidamadeenna lagu hagaajiyo. Awoodda dhaqaale ee aad haysato iyo waxa aad u qaban karto ciidamadaada, dadkaaga iyo dalkaaga aad bay muhiim u tahay. Marka la ogaado dhaqaalaha jira iyo tirada ciidanka, waa in si waafaqsan loogu kala tixgaliyaa oo loogu dabaqaa.

In ciidamadu yeeshaan diiwaan sugan, tiro-koob cad iyo nidaam darajo oo laga bilaabo dable ilaa sareeye gaas waa arrin muhiim ah. Marka xogtaasi sugnaato ayaa suurtogal noqonaysa in daryeelka iyo habaynta ciidamada loo sameeyo si habboon.

Waxaan si gaar ah u taageerayaa daryeelka askarta, waxbarashada carruurtooda, gunnooyinka, hawl-gabka iyo caafimaadka. Dhammaan arrimahaas waa laga hadlay, waana arrimo mudan in la xoojiyo.

Waxaan si gaar ah u taabanayaa marka askari hawl-gal ku jiro ay wax ku dhacaan isaga oo waajib gudanaya, sida shilal ama waxyeello aan ula kac ahayn. Waxaa dhacda in askariga ama qoyskiisa lagu xukumo mas'uuliyadda dhacdadaas, taas oo aan sax ahayn. Aniga fikradaydu waxay tahay in marka askari dirays wato oo dawladda u shaqaynayo, dawladda ay qaaddo masuuliyadda wixii ka dhasha hawshaas, maadaama uu hawl qaran gudanayey.

Arrimahan oo kale waa in si cad xeerka loogu muujiyo si looga fogaado muran, colaad iyo cadaalad-darro.

**Md. Cumar Jaamac Faarax** (12min, 14sec): – Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Mudane Guddoomiye, wax badan ku dari maayo. Qodobka 20aad ee masiibooyinka dabiiciga ah ama kuwa dad sameega ah, inkasta oo amniga gudaha Boolisku u xilsaaran yahay, haddana mararka qaar waxa dhaca dagaallo sokeeye ama kuwo qabiil oo Boolisku xakamayn kari waayaan. Sidaa awgeed, waxaan soo jeedinayaa in ciidanka milatarigu ka qayb qaato, arrintaasna lagu daro xeerka.

Arrinta mushaharrada ciidanka ee lagu sheegay in lala simo wasiirro ama agaasimayaal, waxaan qabaa in aynu diiradda saarno ciidamada hoose, maadaama iyagu yihiin laf-dhabarta ciidanka, halkii aynu kaliya ka eegi lahayn taliyeyaasha.

Barnaamijka shaqo-qaran, waxaan soo jeedinayaa in dib loo soo celiyo, lana bilaabo marka ardaygu dugsiga sare dhammeeyo, isla markaana uu qaato muddo laba sano ah si uu u noqdo askari kayd ah.

**Guddoomiye Yaasiin:** Aad iyo aad ayaan ugu mahadnaqayaa Mudanayaasha. Sida aad soo jeediseen, mudanayaal hore ayaa iyaguna soo jeediyay in muddada shaqo-qaran laga dhigo laba sano. Arrimo badan oo muhiim ah ayaa halkan lagu soo bandhigay, kuwaas oo u baahan in si wadajir ah loo eego si loogu daro xeerka.

Arrimaha aan khibradda u leeyahay ee aad ka hadasheen, gaar ahaan askarta wax dila si aan ula kac ahayn (accident) iyaga oo hawl qaran ku jira, ama iyaga oo isku dayaya inay wax kala celiyaan, waa in dawladda magta bixisaa. Sidoo kale, askarta ku dhaawacanta ama ku dhimata hawl-gallada waa arrimo muhiim ah oo haddii aan xeerka ku jirin, waa in lagu daro.

Mudanayaal, wixii afkaar ah ee maanta la soo jeediyay inta suurtagal ah waa lagu soo darayaa, ka dibna waanu idiin keenaynaa si loo isla eego loona go'aamiyo wakhtiga codaynta. Aad iyo aad ayaad u mahadsan tihiin, fadhigana halkaas ayaynu ku joojinaynaa. **WSC.**

| Cawad Cali Maxamed | C/risaaq Siciid Ayaanle |
| --- | --- |
| Agaasimaha W. Shuruucda & H/qoraalka G/Wakiilada | Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada |
| ------------------------------------------------ | ------------------------------------- |